

Goobahaan/meelahaan waa in xirataa af-dabool

Talaadadii 5 Janaayo, madaxe sare ee maamulka Malvik wuxuu ansixiyay amar loogu talagalay in wajiga loo isticmaalo faashada-afka fagaaraha dadweynaha. Tani waxay khuseysaa illaa iyo 18-ka Janaayo. Amarada isticmaalka af-daboolka waxay khuseeyaan:

- Dukaamada
- meelaha guud ee xarumaha dukaamaysiga santerka ah
- meelaha makhaayadaha ah ee leh ama aan lahayn rukhsad si loogu iibin karo khamro/aalkohol, marka laga reebo marka uu qofku miiska fadhiisto. Waxay khuseysaa shaqaalaha iyo martida labadaba.
- timo jarista iyo saaluunada/meelaha la isku qurxiyo iyo meheradaha kale ee leh in xiriir dhaw lala sameeyo dadka. Tusaale ahaan meelaha bixisa daryeelka maqaarka, (Tatoveringer), daloolinta dhagaha iyo sanko (piercing) iyo waxqabadyada kale ee hoos imanaya qawaaniinta 6 Maajo 1998 lambar 581 oo ku saabsan shuruudaha nadaafadda ee timo-jareynta, daryeelka maqaarka, howlaha (Tatoveringer) iyo daloolinta, iwm. (xeerarka nadaafadda) Waxay khuseysaa shaqaalaha iyo macaamiisha labadaba.
- Caqiidada- iyo meelaha lagu cibaadaysto sida masaajidka iyo kiniisadaha
- Goobaha dhaqanka, isboortiga, jimicsiga iyo howlaha firaaqada, tusaale shineemooyinka ama hoolalka ciyaaraha. Ciyaartoyda, tani ma khuseyso inta lagu jiro dhaqdhaqaaqa dhaqameed / isboorti ee dhabta ah
- qolalka sugitaanka ee dhakhaatiirta, dhakhaatiirta ilkaha iyo xirfadlayaasha kale ee caafimaadka
- meelaha caamka ah ee ka furan dadweynaha dhismooyinka dadweynaha
- Banaanka meelaha dadku ku badan yahay (tusaale. Istaanka basaska)
- iskuulada wadista baabuurta iyo tababarka barshada baabuurta. Waxay khuseysaa shaqaalaha iyo ardayda labadaba..

Amarku ma khuseeyo ardayda iyo shaqaalaha iskuulada, naadiyada iskuulka kadib iyo xanaanooyinka caruurta. Amarku wuxuu khuseeyaa dhammaan dadweynaha dhashey kahor 2009, marka laga reebo dadka sababo caafimaad awgeed aan xiran karin af-daboolka.

Waajibaadka in la isticmaalo af-dabool la qaadanayo basaska iyo tareenada (gaadiidka dadwaynaha)

Amarku wuxuu khuseeyaa dirawalka iyo rakaabka dhammaan nooc kasta oo gaadiidka ah taksi ee degmada Malvik..

Amarku ma khuseeyo:

- carruurta da'doodu tahay 12 sano ama ka yar
- dadka sababo caafimaad awgood, aan isticmaali karin af-daboolka